Xarumaha barbaarinta iy dugsiyada degmada Hässleholm

Maamulka carruurta iyo waxbarashada ee degmada ayaa u xilsaaran xarumaha barbaarinta, rabbeynta, xarumaha fasaxyada dhallaanka, dugsiyada hoose/dhexe, dugsiyada sare, dugsiyada naafada iyo dugsiyada dhaqanka.

Marka aad shaqayso ama waxbarato, wuxuu ilamahaagu xaq u leeyahay dugsiga barbaarinta ama xarunta xannaanada carruurta ilaa uu ka buuxsanayo 12 sano. Haddii aad haysato ilmo da'diisu tahay 1 ilaa 6 sano waxaad xaq u leedahay in ilmaha boos lagaaga siiyo xarunta xannaanada, waa haddii aad shaqa-raadis tahay ama aad ilmo muluq ah guriga ku hayso. Booska ilmahaagu ka helo dugsiga barbaarinta ama xarunta xannaanada carruurta waxaa laga bixiyaa khidmad go'an. Balse carruurta da'doodu u dhexeyso saddex iyo lix sano waxay xaq u leeyihiin in ay bilaash ama lacag la'aan ku tagaan dugsiga barbaarinta ama xarunta xannaanada carruurta shan iyo toban saac toddobaadkii.

Magaalada Hässleholm waxaa ku yaal shan iyo labaatan dugsi oo hoose/dhexe ah oo xannaanada carruurtu weheliso, kontomeeyo dugsiyo barbaarin iyo hal dugsi sare. Dugsiga hoose/dhexe ee carruurta dhimir-dhiman ayaa ka dhex furan dugsiyo badan oo hoose/dhexe. Waxaa kaloo jira dugsi sare oo loogu talagalay dhallaanka dhimirka dhiman. Dhammaan carruurta Iswiidhen ku nool waxaa waajib ku ah in ay dhigtaan dugsiga hoose/dhexe oo lacag-la'aan ah. Waalidka ama qofka ilmaha mas'uul ka ah ayaa xil ka saaran yahay in uu ilmuhu dugsiga yimaado.

Laga bilaabo sannad ilmahaagu buuxsado lix sano waxaa dugsiga kuugu dhow looga diyaarinayaa boos uu dhigto. Sannadka ugu horreeya wuxuu ilmuhu dhigtaa fasalka barbaarinta. Fasalka barbaarintu waa ikhtiyaari, laakiin carruurta Iswiidhen ku nooli sida ay u badan yihiin waxay ka qaybqaataan hawlaha barbaarinta iyo waxbarasho u diyaarinta laga qabanqaabiyo fasalada barbaarinta. Sannadka ilmuhu buuxsado toddoba sano wuxuu bilaabayaa waxbarashada khasabka ah ee dugsiga hoose/dhexe.

Kadib marka ilmuhu dhammeysto dugsiga hoose/dhexe, waxaa fursad loo siinayaa in uu doorto dugsi sare ama waxbarasho kale haddii uu ka weyn yahay 19 sano. Magaalada Hässleholm waxaa dhallinyarada dhowaan Iswiidhen timid oo

da’doodu u dhexeyso 16 ilaa 20 sano loogu deeqaa waxbarasho ay ka dhigtaan xarunta dhallinyarada oo lagu magacaabo Ungdomscentrum. Ungdomscentrum waxaa lagu dhigayaa waxbarasho dugsiga sare oo diyaarin ah iyadoo culeyska la saarayo barashada afka iswiidhishka. Xarunta Ungdomscentrum wuxuu ardaygu ka baran karaa af-iswiidhishka ka sokow maaddooyin kale si uu u gaaro heerka looga baahan yahay waxbarashada qaranka ee dugsiyada sare. Haddaba si loogu qalmo waxbarashada dugsiga sare ee dhallinyarada, waxaa la isku xirayaa in la haysto ugu yaraan shahaadada siddeed maaddo oo mid ka mid ah oo khasab ahi ay tahay iswiidhishka luuqad labaad ahaan. Shuruudda la iska rabo si loo gaaro natiijada shahaadadaas waxaad ka akhrisan kartaa boggaan http://www.skolverket.se/laroplaner-amnen-och-kurser/grundskoleutbildning/grundskola/svenska-som- andrasprak

Waxaa jira gaadiid ardayda dugsiga geeya kana soo qaada, taas oo ku xiran masaafada dugsiga. Waalid ahaan waxaad ilmahaaga u dooran kartaa dugsigii aad doonto, laakiin kolkaas adiga ayaa bixinaya kharashka gaadiidka geynaya kana soo qaadaya dugsiga.

Dugsiga barbaarinta iyo dugsiyada caadiga ah waxaa carruurta iyo ardayda looga diyaariyaa cunto. Cuntooyinkaasna waxaa la waafajiyaa carruurta diin ahaan ama caafimaad ahaan u baahan cunto gaar ah.

Waxaa dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa sareba jooga kalkaaliye caafimaad, dhakhtar, dhakhtarka nafsiga iyo lataliye.

Xeerarka nidaamka iyo isku si ula dhaqanka

Haddaba si dhammaan dadka dugsiga joogaa u helaan fiyoobi iyo horumar waxaa dugsi walba ka jira xeerar lagu dhaqo nidaamka dugsiga iyo qorshe si isku mid ah ula dhaqan saameeya dhammaan shaqaalaha iyo ardayda dugsiga.

Sharci ahaan waxaa dugsiga dhexdiisa mamnuuc ka ah in qof loo takooro jinsigiisa, qowmiyaddiisa, dabcigiisa galmada, diintiisa ama wixii caqiido kale ah, naafanimadiisa, da’diisa iyo wixii kaloo ku saabsan dhaqankiisa iyo aqoonsigiisa qof ahaaneed.

Waxaa kaloo mamnuuc ah in qof loo la dhaqmo hab ku dhisan quursi iyo sharaf-rid. Waxaa kaloo laga oggolayn dugsiga dhexdiisa in xoog la isticmaalo, xag muruq

iyo xag maskax middoodba. Waxaan khilaafyada ku xallinna wadahadal. Mar walbana waxaa dugsiga jooga dad waaweyn oo lala xiriiri karo.

Wadashaqaynta guriga iyo dugsiga barbaarinta/dugsiga caadiga ah

Waalid ahaan waxaa mar walba lagugu soo dhoweynayaa in aad booqasho ku timaaddo dugsiga barbaarinta, xarunta xannaanada carruurta ama dugsiga caadiga ah. Wadashaqaynta idiin dhexeysa adiga iyo dugsigu waxay muhiim u tahay ammaanka iyo horumarka cunuggaaga. Marka aad dugsiga timaaddo waxaa lagu siinayaa kood aad ku gasho barnaamijka kombiyuutarka ee lagu magacaabo Schoolsoft, halkaas oo aad ka heli karto warbixin ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo warbixin guud oo ku saabsan wax ka dhaca dugsiga.

Dugsiga barbaarinta iyo dugsiga caadiga ah waxaa xil ka saaran yahay ka warhaynta carruurta. Haddii ilmahaagu dugsiga ka maqnaanayo, waxaa waajib kugu ah in aad dugsiga ku soo wargeliso inta uusan dugsigu bilaaban ka hor. Haddii ay noo suurtageli weyso inaan xiriir kula yeelano marka ilmahaagu iska maqnaado iyadoo aan la soo sheegin, waxaan la xiriireynna boliiska ama xafiiska arrimaha bulshada. Waxaa taas looga gol leeyahay sugidda ammaanka ilmahaaga iyo in ay sidaas darteed muhiim tahay in uu dugsigu mar walba haysto warbixinaha ugu dambeyyey oo lagaa la soo xiriirayo**.**

Waxaa laguugu yeeri doonaa in aad timaaddo dugsiga barbaarinta ama dugsiga caadiga ah si aad uga qaybqaadato wadahadalada ku saabsan barnaamijka horumarka cunuggaagu ku gaarayo hadafka waxbarashada iyo qaababka waxbarashada oo hawlahaas lagu fulinayo.

Waalid ama mas'uul ahaan waxaan mar walba soo dhoweyneynnaa wixii ra'yi aad noo soo gudbineyso. Adigoo xubin ka noqonaya guddiga wadashaqaynta dugsiga, guddiga waalidka/ururka waalidka, waxaad waalidka kale kala kaashaneysaa sidii aad saameyn ugu yeelan lahaydeen hawlaha dugsiga.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan dugsiyada Hässleholm, booqo www.hassleholm.se.

Wixii warbixin dheeraad ah oo ku saabsan dugsiyada barbaarinta iyo dugsiyada caadiga ah oo ka furan Iswiidhen, waxaad ka heleysaa buug-yaraha lagu *Dugsiga barbaarinta loogu talagalay cunuggaaga* iyo *Dugsiga caadiga ah oo loogu talagalay cunuggaaga* iyo *Xarunta xannaanada carruurta loogu talagalay*

cunuggaaga. Waxaana lagu siinayaa marka aad dugsiga u timaaddo qorista cunuggaaga.

Barashada afka hooyo

Ardayga qofka xannaaneeya uu ku hadlo af aan ahayn iswiidhishka waxaa loogu deeqayaa in la siiyo casharo uu afkaas ku barto, waa haddii
1. afkaasi yahay af uu ardaygu ugu baahan yahay xiriirka guriga, iyo
2. ardaygu uu aqoon asaasi ah u leeyahay afkaas ama luuqaddaas.

Maamulaha dugsiga ayaa go'aan ka gaaraya xiisadaha barashada afka hooyo. Waxaase shardi ah in ay degmada ku nool yihiin ugu yaraan shan arday oo doonaya in ay bartaan isku af iyo in ay jiraan macallimiin ku habboon in ay dhigaan afkaan.

Ardayda ku hadasha afafka qaranka ee dadka laga tirada badan yahay waxaa barashada afkaas loogu deeqayaa xataa haddii aan afkaas laga isticmaalin guriga. Barashada afafka laga tirada badan yahay mar walba waa la diyaarinayaa iyadoo aan loo eegin tirada ardayda u baahan.

Af-iswiidhishka luuqad labaad ahaan

Haddii maamulaha dugsigu go'aamiyo wuxuu af-iswiidhishka luuqad labaad ahaan beddelayaa maaddada af-iswiidhishka caadiga ah, waa haddii:

1. ardaygu ku hadlo af kale oo aan ahayn af-iswiidhish,
2. ardayga afkiisa hooyo yahay af-iswiidhishka laakiin laga soo beddelay dugsi ku yaal dal kale, iyo
3. haddii ardaygu yahay ajnebi laakiin qofka xannaaneeya ku hadlo af-iswiidhish.

Ardaygu mar walba xaq ayuu u leeyahay barashada af-iswiidhishka luuqad labaad ahaan taas oo aan ku xirneyn heerka uu luuqadda ka joogo maadaama ay dhammaan ardaydu xaq u leeyihiin in loogu deeqo barashada afkaas iyadoo laga abbaqqadayo baahidiisa gaarka ah. Shahaadada laga qaato barashada af-iswiidhishka luuqad labaad ahaan waxay u dhigantaa shahaadada laga qaato barashada af-iswiidhishka caadiga ah. Maaddaadasna waxaa la dhigan karaa xilliga waxbarashada dugsigu socoto oo dhan.

Hagidda barashada afka hooyo

Hagidda waxbarashadu waa tallaabo caawimaad ah oo dugsigu u diyaariyey ardaygii u baahan. Habka hagidda waxbarashadana waxaa loo qabanqaabiyaa habab kala duwan taas oo ku xiran hadba sida baahidu tahay.